



UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay 17/07/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXISADA 1AAD:- MADINO IBRAHIM, Hooyo Faadumo Faarax Yuusuf, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 25/12/1951, Sidata Sweden Passport.no. Lr. 35464123

WAKAALAD BIXIYAHA 2AAD:- SALIM ABDI JEILANI, Hooyo: Safiya Cali Jaamac, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 12-04-1989, Degan Xamar weyne, Sita Warqad Sugnaan, Lr. 858137, Kana soo baxay Dowladda Hoose ee Muqdisho

DAMIIN AQOON:- JAMA DAQANE ALI, Somali ah, Ku Dhashay: Isiolo, Sanadkii: 10-06-1978, Sita: Kenyan passport, Lr. BK015561 .

LA WAKIISHE:- ABDINASSIR MOHAMED HAJI, Ina Maryan Ali Mohamed, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 01/01/1961, Degan Xamar weyne, Sita License, Lr. 30378, Kana soo baxay wasaaradda Gaadiidka Ee Dawladda Federaalka Soomaaliya

TILMAAMAHA DHULKA

Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Hodan)**, Cabirka: **(17.50X30-Mt)-M**, Looto No: **Nagaazin**, Ka Soo Baxday Dawladda Hoose ee Muqdisho

SOOHDINTA DHULKA

Bari: Guri dad, Koonfur: **Jid**, Galbeed: **jid**, Waqooyi: Guri dad

B- Anigoo ah **1- MADINO IBRAHIM** Waxaan qoraalkaan ku Cadaynaynaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba Ka fiyow Cid iqasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **ABDINASSIR MOHAMED HAJI** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Qeybta dhaxalka ah ee aan ku leeyahay Gabadheyda Marxuumad **SAFIYA CALI JAAMAC**, oo iyaduna sii dhaxleysa Dhulka uu ka geeriyooday Aabaheed Marxuum **CALI JAAMAC CALI**, **2-** Anigoo ah **SALIM ABDI JEILANI**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynaynaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba Ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay isla **ABDINASSIR MOHAMED HAJI** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Qeybta dhaxalka ah ee aan ku leeyahay Hooyadeey Marxuumad **SAFIYA CALI JAAMAC**, oo iyaduna sii dhaxleysa Dhulka uu ka geeriyooday Aabaheed Marxuum **CALI JAAMAC CALI**, hadaba waxaan si buuxda ugu wakiilanay in uu inoo gadi karo, Xafidi karo, dayactiri karo, kireeyn karo, Xanaaneyn karo, ilaalin karo, u Doodi karo, Qareen inoo qaban karo haddii loo baahdo, nagu Matali karo dhan kasta la inooga baahdo, inoogana doodi karo maxkamadaha dalka darajadooda kala duwan, inoona sameen karo waraaqaha dhaxalkoobka ah, isla markaasna inoo saxiixi karo kaalinteenaa ku aadan dhamaan waraaqaha la inooga baahdo suul iyo saxiixba sida waraaqaha dhaxalkoobka ah, una idman yahay in uu si buuxda u Maamulo Dhulkaas asalkiisa kasoo jeeda marxuum **CALI JAAMAC CALI** lehna tilmaamaha kor kusoo sheegnay. Waxaan mar kale sii caddeynaynaa in **ABDINASSIR MOHAMED HAJI** awoodaas aan siinay uu u madax banaan yahay oo anaga Qeyb dhaxaleedkaas aan soo sheegnay ka macaamilideeda wax na looga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **JAMA DAQANE ALI**, Waxaan Cadaynayaa in aan Damiinu Aqoon ka ahay Wakaalad Bixiyaha Lagu Magacaabo **1- SALIM ABDI JEILANI**, Masuul buuxana aan ka ahay wax allaala wixii dhib ah ee ka yimaada magacaas aan ku damiintay.

J- Aniga oo ah **ABDINASSIR MOHAMED HAJI**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiiyeen **1- MADINO IBRAHIM 2- SALIM ABDI JEILANI**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufna iyo Cadda Islaamka Waafaqsan Insha Allah.





SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA 1-AAD

MADINO IBRAHIM

[Signature]

SAXIIXA DAMIIN AQOONSIGA

JAMA DAQANE ALI

[Signature]

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA 2-AAD

SALIM ABDI JEILANI

[Signature]

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

ABDINASSIR MOHAMED HAJI

[Signature]

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- MOHAMED ABDULLAHI MUSE

[Signature]

2- MOHAMED AHMED ARTAN

[Signature]


(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1656/T.P.N/25, Tr. 17/07/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- MADINO IBRAHIM**, **2- SALIM ABDI JEILANI** Ahna (Wakaalad Bixiyayaal), **3- JAMA DAQANE ALI** Ahna (Damiinu-Aqoon), **4- ABDINASSIR MOHAMED HAJI** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

[Signature]





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 06/08/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **CABDINASSIR MAXAAMED HAJI** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1656/T.P.N/25, Tr. 17/07/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	CABDINASSIR MAXAAMED HAJI
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	17.50X30-Mt
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Hodan
Lotto Lambar	Nagaazim
W.M.L	
Taariikhda Wakaalada	17/07/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **CABDINASSIR MAXAAMED HAJI**, Leh Tel No. **0615778779**, Degan **Xamar weyne** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

CABDINASSIR MAXAAMED HAJI

C/NASSIR